



## 5 Waxyaabood oo ay tahay inaad Ka Ogaato ee Ku Saabsan Khadka Taleefoonka ee Taageerada Kiis ee OHA COVID-19

Wac 866-917-8881 haddii laga helo COVID-19 oo:

- 1** Aad jeclaan lahayd macluumaad caafimaad oo dheeraad ah.
- 2** Waxaad qabtaa su'aalo ku saabsan go'doominta ee lagugu talagalay adiga ama karantiilka loogu talagalay dadka aad xiriir dhow la sameysay.
- 3** Waxaad qabtaa su'aalo ku saabsan inaad ogeysiiso dadka xiriirka dhow aad la sameysay in laga yaabo inay u-bayla noqdeen COVID-19.
- 4** Aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan wax caawimaad ama agabyo laga yaabo in laga heli karo agaaga gudihiisa.
- 5** Waxaad u baahan tahay inaad isgo'doomiso oo aad ka walaacsan tahay wax ku saabsan awoodaada ah inaad taas samayso.

### S. Kawaran waxaa dhacaya haddii aanan ku hadlin Ingiriis?

OHA waxaa ay leedahay shaqaale ku hadla Isbaanish oo diyaar ah kuwaas oo ku caawin kara adiga iyo qoyskaaga. Si aad u hesho luqadaha aan ka ahayn Ingiriiska iyo Isbaanishka, shaqaalaheena waxay heli karaan oo ayna u tababaran yihiin inay isticmaalaan turjubaano. Waxaa sidoo kale aad ka heli kartaa macluumaad waxtar leh Su'aalaheena Badanaa La Isweydiiyo(FAQ) ee laga helo halkan, oo ku qoran 12 luqadood.

### S. Waa tee cida aan la hadlayo?

Kooxda Taageerada Kiiska ee OHA COVID-19 waxay leedahay shaqaale u tababaran baaritaanka kiiska iyo raadinta xiriirka kuwaas oo ku siin kara waxbarashada caafimaadka COVID-19 oo kula wadaagayaa macluumaadka ku saabsan sida aad u ilaalineyso adiga iyo kuwa aad jeceshahay badqabkooda.

### S. Waa maxay sababta aan u wacaayo?

Kooxda Taageerada Kiiska ee OHA COVID-19 waxay halkan u joogaan inay ku taageeraan adiga iyo qoyskaaga haddii aad qabto su'aalo ku saabsan fahamka natiijooyinkaaga baaritaanka togan ama aad u baahan tahay caawimaad dhanka agabyada bulshada. Fadlan naga soo wac 866-917-8881.

### S. Waa maxay waxa kale ee khadkan taleefoonka uu aniga i siin karo?

Macluumaad ku saabsan waxa ay yihiin agabyada laga yaabo in laga helo meelaha kuu dhow iyo goorta iyo sida loola xiriiro Maamulka Caafimaadka Dadweynaha ee Deegaankaaga.

**Janaayo 12, 2022**